# Golaha Wakiilada JSl

## Waaxda Hadal Qoraalka

*Minuteska*

**Dooda Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Gobolada iyo Degmooyinka**

**Kal- fadhigii 14aad          Fadhigiisii 26aad          27/03/2011**

**Ajendaha fadhiga:-**

- ***Xeerka Isaagaadhsiinta Xukuumadu soo gudbisay***
- ***Xeerka Hay'ada abaabul ka saarka X/Lr. 48/2011 ee Guurtida Ka soo noqday***
- ***Waxka badalka Xeerka Gobolada iyo Degmooyinka Xeer No.23***

Fadhigan oo uu furay Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Hon. C/raxman Maxamed C/laahi Ciro** wuxuu xusay in shalay Mudanayaasha Golaha Loo qaybiyay Xeerkii isgaadhsiinta oo la socdaan Lifaaqii Madaxweynaha iyo kii Gudida dhaqaaluhu kaga soo talo bixisay, Xeerkii NDCda oo Guurtida ka soo Noqday iyo Waxqabad iyo Kaabis Xeerka Gobolada iyo Degmooyinka Xeer Lr.23 oo Xukuumadu inoo soo gudbisay iyo Nuqulka Codsiga Daabacadaa Noodh cusub oo shillinka Somaliland oo 1000 iyo 5000 oo shillin ah, intaa ka dib wuxuu ku soo dhoweeyay Gudoomiyaha Gudidda Dhaqaalaha **Md. Maxamed X. Maxamud Cumar Xaashi** oo akhriyay soo jeedinta Gudidiisa isla markaana soo Jeediyay in Xeerka Isgaadhsiinta dib loogu celiyo Xukuumada oo ay xeer dastuurka waafaqsan soo diyaariyaan.

Sidoo kale wuxuu gudoomiyuhu iclaamiyay in Xeerka Hay'ada abaabul ka saarka iyo jihaynta oo Golaha Guurtidu soo celiyay wax ka badalkiisa loo codeeyo.

***Codkiina wuxuu u dhacay sida:- Tirada Guud ee Fadhiga:- 55 mudane***

**Ogolaaday:- 50 mudane**
**Diiday:- 1 mudane**
**Aamusay:- 3 Mudane, Gudoomiyhu Muu codayn Sidaasuu Ku *Ansaxay***

***<u>Dooda Wax ka-badalka iyo Kaabista Xeerka Gobolada iyo Degmooyinka Xeer Lr.23</u>***

Waxaa intaa ka dib uu Gudoomiyuhu iclaamiyay in mudanayaashu ka doodaan Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Gobolada iyo degmooyinka Xeer Lr.23, oo Xildhibaanada Dooda ka qayb qaadanayaa ay is-diiwaangaliyaan, Waxaana Isla maanta bilaabmay Doodii Xeer lr23.

1. **Md. C/raxmaan Cismaan Caalin:-**, **Qodobka 112aad ee dastuurka far.1aad** ee ka hadlaya adeega bulshada wuxuu leeyahay "maamulka adeeyada bulshada sida caafimaadka, waxbarashada, nabadgalyada, xanaanada xoolaaha, Nalka, Biyaha iyo isgaadhsiinta iyo wixii la mida wuxuu xilkoodu saran yahay maamulada Gobolada iyo Degmooyinka hadba heerka hanan karaan", taasna looma wareejin karo Wasaarada, waana heer Gobol, ee heer National ah maaha, Wasaaraduna waa Qaran, loomana wareejin karo Heer Gobol awooda wasaarad hoos timaada Wasaarad kale.

   ***Waxaan soo jeedinayaa:-*** mar hadii aanu Qodobadaa la inaga soo codsaday aanay waafaqsanayn dastuurka, dib ha loogu celiyo xukuumada.

2. **Md. C/qaadir X. Ismaaciil Jirde:-** Anigu fikrad ka duwan tii Xilldhibaankii hore ayaan qabaa, waxani waa Resource waana Hanti Qaran, mana ah hanti la odhan karo Degmaa leh ama Gobol baa leh, hadaynu ogolaano in Biyaha Gobol ama Degmo yeelato aynu ogolaano in patrolkana Gobol ama degmo yeelato iyo macdanta kale ee soo baxdaba, awooda dastuurku bixinayaa ee **Qodobka 112aad** waa Conditional, oo waa hadii ay fulinkarayaan, hadayna fulin karayna halkeeda fadhiyi mayso waa la delegate garaynayaa authoritygaa, awooda degmadu leedahay hadaanay fulinayn waa la delegate garaynahaa oo central Governmentga ayaa la wareegaysa, awoodu baadi noqon mayso oo authority baadi noqonaysaa ma jirto fulna maaha, Sidoo kale **Qodobka 12aad farqdadiisa 4aad** ee dastuurku, waxay sheegaysaa in dhamaan khayraadka dabiiciga ah ay dawlada dhexe ka masuul tahay.

   Mida kale inagu ma lihin Regional Government oo Dawlad Goboleed la soo doorto ma lihin, waxaynu leenahay Dawlado hoose iyo Dawlada dhexe (Central Government), labadaa waxaan ahayn waxay noqonaysaa Jidgooyo awoodii loogalayo, Badhasaabku maaha Regional Authority oo Central Government ayay matashaa oo wakiil ka yahay, markaa dawlad gobol oo awoodaa qaadi kartaa ma jirto ilaa inagu samayno mooyaane, waxayna ku imanaysaa hadii ay timaado Regional Government la doortay.

   Markaa anigu waxaan qabaa sidii Wasiirku halkan inooga sheegay ee uu yidhi mabdi'iyan anagu waan ogol nahay in ay iyagu leeyihiin sida tacliinta ay u leeyihiin oo

Degmadu booliiskeeda u qorato oo samaystaan iyagu, hadanay samaysan karayn awoodii ma baadi bay noqonaysaa oo halkii bay taagnaanaysaa? Waa maya, waa in laga soo qaadaa markaa hadii kale maamul la'aan baa dhacaysa,

***Waxaan soo jeedinaya:-*** in sidii Wasiirku inoo sheegay inaanay mudnaanta koowaad noqonayn anagaa iska leh, ee markaa cidii maamulan karta ee hagaajisan karta sidaa Boorama ha loo ogolaado ayaan soo jeedinayaa.

3. **Md. Xamse Maxamed Gaadaweyne:-** waxa weeye intii experianceka laga arkay Wakaalada Biyuhu waxaad moodaa inay runtii noqotay markastoo la hoos geeyo wasaarada way fail garowdaa oo hawsha halkaas ee biyaha ku saabsan, tii sharciga Xilldhibaanadii iga horeeyay baa ka hadlay. ***Makaa waxaan soo Jeedinayaa***:- in loo daayo Wakaaladaha Biyaha Degmooyinka. Waad mahadsantihiin.
4. **Md. Axmed M. kinjaandhe:-** waxaad moodaa arinkan biyaha ee la leeyahay centralized ha laga dhigo oo ninkan halkan ha maamul biyaha laga cabayo magaalada Ceergaabo anigoo tan afarta talaabo ii jirtaa aanan ka cabin, maahana biyo la'aan baa jirta ee waa farsamo xumo, marka waxaan qabaa in aanay arrinkani Macquul ahayn, taa markaan ka imaado mabaadiidii aan halkan ka ansixinay ee odhanayay awoodaha biyaha iyo laydhka oo kale ha la deegaameeyo ayay ka soo horjeedaan, in awoodo farabadan oo halkan yaala in dejiyo oo la dhaadhiciyo oo maamulkii la gaadhsiiyo ayaynu lahayn, maanta kii aynu dawlada ku hagaajinaynay ee aan wax ku saxaynay ayay ka horjeedaa arrinkani oo runtii aad bay uga fogtahay

Maamulka iyo La haanshaha Wakaalada Biyuhu waa kala jaad, markaa Wakaalada Biyaha Ceergaabo lagu cabaayo iyagu ha maamushaan siday u hagaajisan lahaayeen ha lagu eego oo loo daayo iyaga, oo Golayaasha deegaanadu ha maamulaan, cay bay ku tahay in la yidhaahdo dadka Gobolada iyo degmooyinka biyaha sidaad u cabaysaan ha la idinku maamulo.

Waxay IlA tahay khalad in la yidhaahdo dawlada dhexe ha maamusho biyaha iyadoo ay maamuli karto Dawladaha Hoose. Sidaa daraadeed waxaan odhan lahaa ha loo daayo D/hoose maamulkooda

***Point of correction:-*** Gudoomiyuhu wuxuu sheegay in xeerkan Ceergaabo burco aan loo samaynayn ee uu yahay Xeer Qaran oo Gobolada iyo Degmooyinka oo dhan uu ka dhaxeeyo.

5. **Md. Ibraahim Axmed Haybe:-** anigu waxaan gabi ahaanba ka horjeedaa in maamulka Wakaaladaha Biyaha Wasaarada Biyaha, Macdanta iyo Tamarta lagu wareejiyo, Sidaa waxaa u leeyahay, wasaaradu hore ayay u jirtay, Wasiirkuna hore halkan sanadkii hore wuxuu inoogu sheegay in ceelal badan ay sameeyeen oo ay dayac tireen markii la sameeyayna ceelashii biyihii la iibiyay, markay fariisteena wax lagu dayac tiro la waayay.

   markaa waxaan odhan karaa wasaaradu ma hanan karto maamulka wakaaladaha iminka oo ay taasi muujinaysaa, mida kale wasaarada sharci iyo nidaam baa lagu sameeyay, waxaa bixisay dawlada iyo Golayaasha dadka hanti badan baa ka gashay, in maanta la yidhaahdo dadkii hantidu ka gasahy ee maalkooda ku hagaajiyay waa la idinka wareejinayaa waa khalad, wixii dastuurka ku qornaa in nin doonaya maamul aanu qaadi Karin loog badalaa mataal.

   ***Waxaan soo jeedinayaa: -*** in dawladu faraha kala baxdo wakaalada biyaha hore loo sameeyay ee dhisnaa, wixii ay k dhaliilayso ha keento waxay ku kordhinaysona ha siiso, sida Wakaalada biyaha Boorame oo Hanti Qaran lagu sameeyay waad aragtaa dadkii loo dhiibay siday u najaxday oo hawsheedii uga soo wada baxday.

6. **Md. Cali X. Maxmed:-** Qodobkaa aynu maanta ka hadlaynaa waa qodobka ugu xasaasisan maanta oo dhibaatada dadka haysata tan ugu weyni waa Biyaha iyo sidii loo cabi lahaa, Sidaa darteed Gudoomiyayaashii Gobolada iyo Degmooyinka oo dawlada dhexe wakiil ugu ah, wax kasta iyagaa loo soo marayaa, iyagaa masuuliyada koowaad iska leh.

   Hadii la yiraahdo, masuuliyadii biyaha ee Gobolada iyo Degmooyinka ha lagu soo wareejiyo Wasaarada Biyaha waxaan u malaynayaa waxba u faa'idayn mayso oo maamulkooda aad baynu u sii wiiqaynaa, Gudoomiyayaasha Gobolada iyo Degmooyinka iyagay saran tahay siday dadkooda ugu muumulilahaayeen Biyaha.

   waxaan rajaynayaa in hadii aynu soo wareejino awoodaha biyaha W. macdanta iyo biyaha inaynu sii wiiqayo ee aynaan waxba u tarayn.

Sidaas darteed waxaan odhan lahaa ha loo daayo maamulka biyaha D/hoose ee degmooyinka ka jira, yaanan lagu wareejin Wasaarada Biyaha iyo Macdanta iyo Dawlada dhexe midna.

7. **Md. Max'ed Cali Xirsi:-** ujeedada sidaan u fahmay maamulkii Biyaha ee Gobolada iyo Degmooyinka maamuli jireen in lagu wareejiyo Wasaarada Macdanta, Biyaha iyo Tamarta, waxaan aaminsanahaya sidii xildhibaanadii iga horeeyey sheegeen wuxuu xeerkan baalmarsan yahay Qodobka12aad ee dastuurka qaranka oo sheegaya in maamulida biyaha, u xilsaaranyihiin maamulada gobolada iyo degmooyinka ay ku yaalaan, sidaas daraadeed loo daayo inay maamulkooda gacanta ku hayaan.

Waxaa muhiima dastuuriyan hadaynu nahay Golihii sharci dejinta in xeerkan marka hore dastuurka waafaqsanyahay, Gudida marka xeer loo diro marka ugu horeysa waa inay eegtaa inuu dastuurka waafaqsanyahay, hadaynu jabino inagoon wax kale eegin waa dastuur jabin, inagoo doodna galin meel kalena aan wax ka eegin. Siduu C/raxman dheere sheegay Qodobada 112aad wuu ka hor imanayaa wax ka badalkani.

Markaa waxaan odhan lahaa yaanba cod la galin, tafsiirkaas oo sharciyada aan u eegno oo sidiisa ha lagu celiyo.

Sidoo kale maareeyayaasha Wakaalada biyaha waxaa magacaabi jiray Wasaarada Arrimaha Gudaha iminka waxaa la leeyahay waxaa magacaabaya Wasaarada Biyaha iyo Macdanta, sidii hore maareyayaasha waxaa maamuli jiray Wasaarada Arrimaha Gudaha waana dastuuri oo qodobkaas ayay ku qoran yihiin, Wakalaada Biyaha Hargaysa maxay kaga duwan tahay Wakaaladaha Biyaha ee Gobolada sida Sanaag iyo Togdheer.

***Anigu waxaan soo jeedinayaa:-*** in Wakaalda Biyaha Hargeysa aynu ka qaadno Madaxtooyada oo meesheedii ku celino.

8. **Md. Maxamed Faarax Qabile:-** Biyuhu waa muhiimada koowaad ee haabiyaha asaasiga ee bulshada, iminka waxaa loo sameeyay qaybo private baa laga dhigay oo Hay'ado ayaa la hoos geeyay, Qodobka dastuurka ee 111 iyo 112aad ayaa cadaynaya, laakiin rabitaanka dadka hadii awoodahaasi ka baylahaan waa macquultaasi.

waxaan qabaa in aanay biyuhu ka bixin gacanta Gobolada iyo Degmada, iyagaa uga lexejeclo badan Wasaarada Macdanta iyo biyaha,

***waxaan soo jeedinayaa:-*** in fikir aan haysan saldhig sharci ama dastuur maaha in loo gacan taago oo minuteska lagalayo maaha, waxaan ku raacsanahay XIldhibaanadii iga horeeyay in dib loo celiyo aan doodba laga galin.

9. **Md. Axmedyasin Sh. Cali Ayaanle:-** horta dastuurkeenu mabaadii asaasiya buu leeyahay, mabaadiidaa markii la samaynayay dawladihii fikrad certrilized ah baa laga dhaxlay, oo dawladaha certrilizedka ah maamulkoodu wuu ka daadejisan yahay kuwa decentrilizedka ah, wayna ka cimri dheeryihiin maamulkeedu tan cetrelized ka ku urursanyahay mabaadiida dastuurku ku salaysanyahay taas ayay ku bays garaysnayd, hadana si gaara wuxu u cayimay awooda dawlada kastaa yeelanayso oo deegaankastaa u maamulayo awoodaha uu siiyay,.

Iima muuqato mushkilada ka timi dawlada hoose ama dadkii maamulayay wakaaladaha biyaha, waxaa hadana xusid mudan Hargaysa markii D/hoose maamulaysay Wakaalada Biyaha iyo Maanta oo Madaxweynuhu maamulo iyamay biyo cabis badan tahay mise hoos u dhac baa ku yimi? Xaafadihii cabi jiray baa biyo waayay, markii madaxweynaha la hoos geeyay.

Hadaba wax ka badalkoo dhan ee xeerkan loo keenay, haduu kaa yahay, oo nuxurku yahay in wasaarada Macdanta iyo Biyaha la hoos geeyo Wakaaladah, Wasaaradu inay barnaamij kor loogu qaadayo biyaha la timaado ayay ahayd, laakiin may ahayn inay Wakaaladaha ku soo noqoto.

***Waxaan Soo jeedinayaa:-*** Golahan Ceeb bay ku tahay In la ansixiyo xeer nuxurkiisu dastuurka ka hor imanayo, waxaan qabaa in nuqulkaa sidiisa loo celiyo oo aan laga doodinba, oo awooda maamulida biyaha loo daayo inay maamulaan Gobolada iyo degmooyinku.

10. **Md. Rayte:-** waxaan qabaa arin u dhaxaysa labada arimood ee xildhibaanadii iga hareeyey u badanaayeen, anigu waxaan qabaa wixii maamulka biyaha khuseeya loo daayo degmooyinka balse markay noqoto farsamad iyo sahaminta biyaha ay xukunto Wasaarada macdanta iyo biyaha, sidaa awgeed awooda maamulida biyaha ay wadaagaan labada dhinacba.

***Waxaan soo jeedinayaa:-*** sida Wasaarad walba ay u maamusho isu-duwayaasha Gobolada u jooga in Wasaarada Macdanta iyo Biyuhuna ay maamusho

Wakaaladaha Biyaha ee Gobolada, ilayn Wasaarada Caafimaadka oo kale iyadaa Maamusha Hawlaha Caafimaad ee uu Gobolkastaa leeyahaye.

11. **Md. Baar siciid Faarax:-** ***waxaan soo jeedinayaa oo kaliya anigu:-*** Xeerkan wax ka badalkiisa maadaama uu dastuurka ka hor imanayo in dib loo celiyo oo wax ka badalkiisan aanu sharciba ahayn.

12. **Maxamed Cumar Jiir Md. Waxaan soo jeedinayaa:-** in awooda Joint venture laga dhigo oo labada dhinac ee Maamulka Gobolada iyo Degmooyinku iyo Wasaarada Biyaha, Macdanta iyo Tamartu ay labaduba yeesheen awoodaha maamul ee Biyaha, maadaama dhinac kaliya aan lagu halayn karayn oo Wasaarada iyadaa siyaasadii Biyaha Qaranka khibrad iyo awoodba Maamuli karta, Maamulka Gobolada iyo degmooyinkuna ay yeeshaan awooda adeega Wakaalada biyaha oo toos u hoos tagta Wasaarada Biyaha iyo Macdanta.

## Kal- fadhigii 14aad Fadhigiisii 27aad 28/03/2011

**Ajendihii:-**

- ***In la sii wado doodii Wax ka badalka iyo Kaabista Xeer Lr 23.***
- ***Gudoomiyaha Baanka ayaa sidoo kale Golaha hor yimi si uu xog uga siiyo Noodhka lacagta la soo daabacayo.***
- ***Sidoo kale waxaa mudanayaasha loo qaybiyay Xeerkii isgaadhsiinta oo Xukuumada shalay lagu celiyay oo maantaba keentay Draftkale.***

Fadhigan oo uu Gudoominayay Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Hon. C/raxman Maxamed C/laahi** ayaa sheegay inuu maanta fadhiga marti ugu yahay Gudoomiyaha Baanka dhexe ee JSL. Si uu Golaha warbixin uga siiyo Noodhka lacagta cusub ee la soo daabacayo, sidoo kale wuxuu sheegay inay sii soconayso Doodii wax ka badalka xeerka Gobolada Iyo degomooyinka Xeer lr 23. Ugu horayn wuxuu ku soo dhoweeyay Gudoomiayah Baanka dhexe,

Intaa ka dib waxaa Gudidda dhaqaaluhu ka soo talo bixisay Noodhka cusub ee shillinka lacagta Somaliland, iyadoo Gudoomiyaha Gudidda, Md. Maxamed X. Maxamud Cumar Xaashi uu Mudanayaasha warbixintoodii u akhriyay.

**Waxaa halkeedii laga sii waday doodii Wax kabadalka iyo kaabista Xeer Lr23, oo maanta doodeeda ka qaybqaateen 3 mudane oo kaliya.**

13. **Md.naasir X. Ali shire:- Qodobkan 71aad** xarfihiisa A,B iyo D sidoodii ha loo daayo, oo yaan waxba laga badalin, waxay aniga iila muuqataa, in xeerka sidii hore loodaayo oo aan lagu bedelin caadifad iyo xamaasad.

**Sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa:-** in Xeerkan sidii loo daayo, oo aan waxba laga badalin Qodobkaa.

14. **Md. Saleeban Cawad Cali:-** wax ka badalka kooban ee lagu soo sameeyay Xeerka Lr 23 xeerkii Gobolada Degmada, marka hore waxaan eegayaa wuxuu dastuurku ka yiri **Qodobka 112aad** dastuurka farqadiisa kowaas waxay leedahay, ee ka hadlaya adeega bulshada wuxuu leeyahay "maamulka adeeyada bulshada sida caafimaadka, waxbarashada, nabadgalyada, xanaanada xoolaaha, Nalka, Biyaha iyo isgaadhsiinta iyo wixii la mida wuxuu xilkoodu saran yahay maamulada Gobolada iyo Degmooyinka hadba heerka ay hanan karaan".

Sidoo kale, **Xeerka Lr23, Qodobka 71aad Far. 3aad ee Xarfaha A,B iyo D**, waxay leeyihiin, " Maamulka Gobolada iyo Degmooyinka waxay xaq u leeyihiin kormeerka warbixin la tashi madaxda wakaalada biyaha, iyagoo mar walba ka duulaya daryeelka arrimaha bulshada ee dhinaca biyaha waxayna hoos imanaysaa Wakaalada Biyuhu Maamulka D/hoose" kaasi waa xeerkii Maamulka Gobolada iyo Degmooyinka.

Waxaynu daliishano waxaa u sareeya Dastuurka hadaanu diinta ka hor imanayn, xeerkii wuu sheegayaa, xeerka hadii dib loo eegayo waa in la soo wada caliyaa, oo Golaha la keeno oo wakhti la siiyo la islana eego,

***Waxaan soo jeedinayaa:-*** Xeerku haduu amentmetn u baahan yahay, wadadiisa ha soo maro, caadifad ha laga ilaaliyo, oo Qodobadaa A,B iyo D. sidooda ha loodaayo

15. **Md. c/raxmaan maxamed jaamac:-** sida ku cad xeer hoosaadka Golaha Wakiilada lagama doodi karo loomana codaynkaro xeer ama waxkabedel xeer oo ka horimanaya dastuurka JSL, Qodobada sida cad waxkabedelka xeerkan Lr-23 loogu jebiyey waxaana ka mida sida mudane yaashii iga horeeyey sheegeen qodobka **11aad far.2aad** ee dastuurka **Qodobada 111aad Iyo 112aad** waxaana akhriyey xildhibaankii iga horeeyey oo sheegay in baahiyaha aasaassiga ah ay ka wakiiil tahay degmooyinku.

***Waxan Soo jeedinayaa:-*** si aanay u bilaaban dabaqado dhaqaale oo ka kooban kuwo wax haysta iyo kuwo aan wax haysan, si aanany u balaadhan farqiga u dhaxeeya bulshada Magaalada iyo Miyiga, waa inay dawlada Somaliland Cadaalad iyo sinaan ku Maamushaa Adeegyada Bulshada iyo dhaqaalah, Arrinkani Dastuurkuu ka hor imanayaa waana inaan dastuurka u hiilinaa oo celinaa Wax ka badalka xeekan.

***Gudoomiyuhu wuxuu sheegay intaas ka dib, in Doodii sidaa ku soo xidhantahay Minuteska bari la soo dhamaystiri doono, maalinta barina Golaha Guurtidu Fadhigoodii ina siiyay Chamberka oo aan bari shaqayn doono, sidoo kale in mudanayaashu qaataan Xeerka Isgaadhsiina oo iminka loo qaybiyo, Fadhigii wuu xidhmay.***

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
**------------------------------------------------------------**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSL**
**------------------------------------------------------**